Soomaaliya: Ka tarjumeysa isku filnaansho

Tilmaan (Sawiro ururin):

In ka badan labaatan sanno, colaad, nabadgelyo xumo iyo sharci darro baahsan ayaa waxay sii xumeeyaan qalalaasaha aadaninimo ee Soomaaliya. Intaas waxaa dheer, abaaro soo noqnoqday iyo qiimaha cuntada iyo shidaalka oo sare u kacsan ayaa waxay sababeen sugnaan la'aan cuntada ah iyo hubaal la'aan nafaqada ah meelo badan. ICRC-da waxay ka jawaab bixinaysay baahida deg dega ah ee dadka Soomaaliyeed isla markaana ku caawinaysay bulshooyinka nugul inay u adkeystaan cawaaqibka dabadheeraaday ee sii kordhayaa ee dhibaatooyinkan iyo inay gaaraan isku filnaansho.



**1**

Galgadud, Soomaaliya: Tan iyo bilowga abaartii iyo nafaqodaridii 2011-ka, ICRC-da waxay kaalmeysay labo milyan oo qof si ay u daboolaan baahidooda raashinka aasaasiga ah iyadoo ka fulisay howl-gal samafal ah oo balaaran Koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya iyo Puntland

© ICRC / Yerow, Mohamed



**2**

ICRC-da waxay ka jawaab bixinaysay baahida deg dega ah ee bulshada gaar ahaan meelaha sida aadka ah ay u saameeyeen dagaalada hubaysan ee Soomaaliya. Toboneeyo sano oo colaad ah iyo masiibooyin dabiici ah ayaa waxay si xun u wiiqeen awooda dadka ay isku wadi lahaaeen dhaqaalo ahaan. Sidaa darteed, sanado badan, ICRC-da waxay gargaarkeeda xooggiisa saartey fulinta mashaariic beeraha ah, biyaha iyo shaqo lacag ku bedelasho oo loogu talagalay in lagu soo celiyo ama dib loogu hagaajiyo nolasha iyo sugnaanta dhaqaale ee bulshooyinka ay aafeeyeen xasaradahan.

© ICRC



**3**

Puntland, Soomaaliya: Cunaqeybintii dhoweyd ee la siiyay 77,000 beeralay, xoolo dhaqato abaartu saameysay iyo dadka ay barakiciyeen dagaalada waxaa loogu tala galay in lagu bixiyo cuntada aasaasiga ah oo labo bil ah si loogu caawiyo inay ka baxaan muddada ka horeysa beer goosasha ee Luulyo.

© ICRC / Abdullahi Isse



**4**

Hiiraan, Soomaaliya: Gargaarka cuntada wuxuu u ogalaanayaa dadka ka faa'ideysta inay heystaan agab muhiim u ah nooloshooda kaasoo ay ku bedalan lahaayeen raashin qiimo jaban.

© ICRC



**5**

In badan oo ka mid ah dhibanayaasha dagaalada waxay la daalaa-dhacayaan inay helaan raashin maalin walba. Nolosha ka sakow, nafaqo haboon waxay muhiin u tahay caafimadka, badbaadada shaqsiga, kabsashada iyo horumarka.

© ICRC



**6**

Jawaabta ay ICRC ka bixiso meelaha nafaqadda waxaa wehliya taakulo xaga nolosha ah wuxuuna si toos ah ugu xiran yahay howlo kale oo la xiriira caafimaadka, biyaha iyo deegaanka.

© ICRC




**7**

Hiiraan, Soomaaliya: ICRC-da waxay siisay beeralayda qalab taasoo sare u qaadaysa waxsoosaarka cuntada keeneysana isku filnaansho

© ICRC



**8**

Hiiraan, Soomaaliya: Qaar ka mid ah dadka deegaanka waxay ka faa’ideysanayaan biyo nadiif ah iyo shaqo ku meel gaar ah

© ICRC


**9**
Galgaduud, Soomaaliya: ICRC-da waxay isticmaalaysaa gawaari si ay u gaargaar biyo u gaarsiiyaan dadka u baahan gaar ahaan dadka barakacey.
© ICRC / Omar Sheikh

**10**

Galgadud, Soomaaliya: ICRC-da waxay siisay beeraleyda abuur iyo qalab inta lagu jirey xiliga beerashada waxayna u kireysay cagaf si ay ugu kaalmeyso falka dhulkooda

© ICRC / YEROW, Mohamed